



Xanaanada carruurta ee Barnaamijka Ingiriiska ee Soogalootiga Waaweyn

Barnaamijka Ingiriiska ee Soogalootiga Waaweyn (AMEP) wuxuu siiyaa daryeel ilmood dadka doonaya daryeel ilmood oo haysta ilmo ka yar da'da dugsiga una baahan daryeel ilmood si uu uga qaybgalo xiisadaha AMEP.

Xanaanada Carruurta waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan macmiilaha AMEP, wuxuuna ku yaallaa meel u jirta 30 daqiiqo macmiilaha AMEP markay suurtagalka tahay. Waqtiyada safarka waxaa laga yaabaa inay ka badan yihiin 30 daqiiqo iyada oo ku xiran halka uu ku yaallo tas-hiilaadka iyo sidii lagu helli karo gaadiidka.

Adeegbixiyayaaga AMEP wuxuu isku deyi doonaa inuu diyaariyo daryeel kaas oo u jira guriga macmiilaha AMEP ama xiisadaha AMEP, laakiin taas waxaa laga yaabaa in aanay mar walba suurtagal ahayn.

Daryeelka ilmaha waxaa la bixiyaa keliya markaad tagto xiisada AMEP. Ma khusayso hawlaha kale ee ka baxsan waqtiga xiisadaha AMEP.

Qiimaynta baahida daryeelka ilmaha, adeegbixiyahaaga ayaa laga yabaa inuu ku siiyo xalal kala duwan si aad degdeg ugu bilawdo daraasadaada. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo:

- Inaad wax ka barato xarun bulsho oo leh daryeel ilmood oo goobta ah
- Safar ka fog meeshaad jeclaan lahayd, ee xiisadaha AMEP
- Ku barashada guriga oo bare kuugu imanayo ama barashada durugsan ilaa laga hello goobta daryeelka ilmaha.

Daryeel ilmood waxaa laga yaabaa inaan isla markiiba la helin maadaama boosasku xadadan yihiin aadna loo raadinayo. Si kastaba, adeegbixiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay ku qaban qaabiyaan daryeel ilmood waqti sax ah si ay ula socoto bilaabida koorsada AMEP.

Haddii aad dareemayso qabanqaabinta daryeelka ilmaha in aanu wax ka qabanayn baahidaada, waa inaad kala hadashaa adeegbixiyahaaga AMEP. Macluumaad intaas ka badan ee sida dacwad lagu sameeyo, fadlan eeg buuga ardayga ee xaruntaada AMEP ama la hadal macalinkaaga ama xubin ka mid ah shaqaalaha.

Fadlan ogsoonow haddii aadan ka qaybgelin fasalada AMEP, ama dhamaysan waxbarashada Ingiriiska, waxaad u baahan doontaa inaad qabanqaabsato ciddii kuu hayn lahayd ilmahaaga.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan daryeelka ilmaha la xiriir adeegbixiyaha AMEP.

